# Bilaabida, Ku-darida/Kordhinta, iyo Joojinta Shaqada/Mudada Shaqada iyadoo la adeegsanayo eXPRS Mobile-EVV

## Guudmarka

PSW-yada waxaa looga baahan yahay inay isticmaalaan **eXPRS Mobile-EVV** si ay u diiwaan galiyaan waqtiga ay shaqeeyeen. Hagahan wuxuu tusinayaa tilmaamo tallaabo-tallaabo ah oo ku saabsan adeegsiga eXPRS Mobile-EVV si loo bilaabo muddada shaqada.

Fadlan ogsonow in **eXPRS Mobile-EVV** uu diiwaan gelinayo goobtaada bilawga ah marka aad bilaabayso shaqada, wuxuuna sidoo kale diiwaan geliyaa goobtaada dhamaadka markaad dhameynayso shaqadaada. Tani waxaa u baahan sharciga federaalka.  Nidaamka eXPRS Mobile-EVV **ma** diiwaangelinayo goobtaada mana kula soconayo wakhti kale.

Hagahan waxa loo kala qaybiyay qaybaha soo socda:

## Nuxurka/Kontantka


**Bilaabida, Ku-darida/Kordhinta, iyo Joojinta Shaqada/Mudada Shaqada iyadoo la adeegsanayo eXPRS Mobile-EVV .... 1**

Guudmarka .... 1

Bilaabida Shaqada .... 2

Ku-daridda/Kordhinta Shaqo loogu talagalay Adeegyada Kooxda .... 4

Dhammaystirka Shaqo .... 8

Lifaaqa A: Illaawida in Shaqada la Dhammeeyo Wakhtigeeda .... 10

Lifaaqa B: Dhammaynta Shaqada Goor Dambe .... 12

Lifaaqa C: Macluumaad Gaar a uh Adeegga .... 12

Daryeelka Gargaarka Maalinlaha ah ee OR507 .... 12

# Bilaabida Shaqada




Gal [Mareegta eXPRS](https://apps.state.or.us/exprsWeb/) adigoo adeegsanayo qalabkaaga gacanta oo geli Magacaaga iyo Eraygaaga Sireed/Baasweerkaaga Gelitaanka. Kadib dooro **Gudbi**.




Dib u eeg fariimo kasta oo muhiim ah, ka dibna dooro **Qir** si aad hore ugu sii socoto.




Markaad joogto shaashada **Dooro** Adeegga, ka dooro liiska Adeega Firfircoon ee Ogolaanshaha Hore ee maalintaas, ka dibna dooro **Sii Wad**.




Markaad joogto shaashada **Dooro** Shaqsiyaadka, dooro shakhsi-ga(yaadka) aad shaqada u bilaabayso. Haddii aad la shaqaynayso wax ka badan hal qof, dooro magaca shakhsi kasta. Ka dibna dooro **Sii Wad**.




Markaad joogto shaashada **Fadlan** Xaqiiji, dib u eeg macluumaadka oo dooro **Bilow Shaqada**. Iyada oo ku xidhan budhiga qalabkaaga, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto ogolaanshaha goobta. Kuwani waa in loo oggolaadaa si loo bilaabo shaqada.




Ka dib markaad doorato **Bilow Shaqada**, waxaa lagu geyn doonaa shaashadda **Gelinka Shaqo Wuu** Bilowday, halkaasi oo Calaamadda Sax ee Cagaaran ay muujinayso inaad bilawday shaqada.

Ka dib markaad dhamaystirto talaabooyinkan, waxaad dib u eegi kartaa faahfaahinada shaqada aad bilawday:




Hadda waad ka bixi kartaa nidaamka oo waxaad bilaabi kartaa shaqadaada.

## Ku-daridda/Kordhinta Shaqo loogu talagalay Adeegyada Kooxda

Waxaa jira waqtiyo uu bixiyaha PSW waqti isku mar ah u adeego in ka badan hal qof. Tusaale ahaan, PSW ayaa laga yaabaa inuu u adeegayo shakhsi, ka dibna qofka ay wada degan yihiin shakhsiga oo isna hela adeeg ayaa ku soo biiraya si ay u wada aadaan safar dukaameysi.

Tani waxaa loo tixgeliyaa adeegyada “kooxda”. eXPRS waxay qiimeysaa qaddarka lagu soo dallacayo qof kasta oo ka mid ah “kooxda” iyadoo lagu saleynayo qaybta waqtiga ee qofka ka tirsan “kooxda” si ay ula mid noqdaan mushaharka saacaddiiba ee wakhtiga PSW-ga uu shaqaynayo.










Gal [Mareegta eXPRS](#) adigoo adeegsanayo qalabkaaga gacanta oo dib u eeg shaqadaada haddeer socoto. Ka dibna dooro **Bilow Shaqo Cusub**.

Markaad joogto shaashada **Dooro** Adeegga, ka dooro liiska Adeega Firfircoon ee Ogolaanshaha Hore ee maalintaas, ka dibna dooro **Sii Wad**.

Markaad joogto shaashada **Dooro** Shakhsiyaadka, kaliya shakhsiyaadka aadan u haynin shaqo haddeer socoto ayaa ka muuqan doona. Dooro shakhsi-ga(yaadka) aad rabto










Markaad joogto shaashada **Fadlan** Xaqiiji, dib u eeg macluumaadka oo dooro **Bilow Shaqada**. Iyada oo ku xidhan budhiga qalabkaaga, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto ogolaanshaha goobta. Kuwani waa in loo oggolaadaa si loo bilaabo shaqada.

Akhri fariinta xaqiijinta ee sheegaysa inaad ku dhowdahay inaad bilowdo adeeg Kooxeed. Ka dibna taabo **Xaqiiji** si aad ugu darto shaqada cusub.

Ka dib markaad doorato **Xaqiiji**, waxaa lagu geyn doonaa shaashadda **Gelinka Shaqo Wuu** Bilowday, halkaasi oo Calaamadda Sax ee Cagaaran ay muujinayso inaad

Ka dib markaad dhamaystirto talaabooyinkan, waxaad dib u eegi kartaa faahfaahinada shaqooyinka aad bilawday:




Hadda waad ka bixi kartaa nidaamka oo waxaad sii wadi kartaa shaqadaada.

# Dhammaystirka Shaqo










Gal Mareegta eXPRS adigoo adeegsanayo qalabkaaga gacanta oo dib u eeg shaqadaada haddeer socoto. Kadibna dooro **Dhammee Shaqada**.

Markaad joogto shaashada **Dooro** Shaqsiyaadka, dooro shakhsi kasta oo aad u dhammaynayso shaqada. Ka dibna dooro **Sii Wad**.

Markaad joogto shaashada **Fadlan** Xaqiiji, dib u eeg macluumaadka oo dooro **Haa** si aad u dhammayso shaqooyinka.

Kadib dhamaystirka tillaabooyinkan, waxaad heli doontaa calaamada sax oo cagaaran oo muujinaysa in shaqooyinka ay dhamaadeen:




Shaqooyinkan waxaa loo kaydiyaa ***qaybo ahaan*** marka la sameynayo Biil-dallicida Adeegga La Bixiyay ee eXPRS:



| SPA ID | SD ID | Client Prime | Client Name | Provider | DHS Contract Num | Contractor Name | SE | Proc | Mod | SD Mod Reason | Service Begin | Service End | Group Setting | Service Hours | Service Units | Billed Hours/Units | Total Direct Support Time | Rate | Amount | SD Status | Claim ICN | Begin Location | End Location |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 11[redacted] | 63 | R[redacted] | John Smith | [redacted] | [redacted] | [redacted] | 49 | OR526 | NA | REG | 06/30/2025 01:58 PM PDT | 06/30/2025 05:21 PM PDT | Yes | 3:23 | | 3:23 | NA | | | Draft | | 44.0 -122[redacted] | 44.9 -122[redacted] |
| 13[redacted] | 74 | B[redacted] | Jane Smith | [redacted] | [redacted] | [redacted] | 149 | OR526 | NA | REG | 06/30/2025 05:14 PM PDT | 06/30/2025 05:21 PM PDT | Yes | 0:07 | | 0:07 | NA | | | Draft | | 44.9 -122[redacted] | 44.9 -122[redacted] |



Biilka Adeegga La Bixiyay ee Qabyada ah ayaa la tafatiri karaa markii loo baahdo iyadoo la adeegsanayo Ablikeeshanka Desktop-ka ee eXPRS.

# Lifaaqa A: Illaawida in Shaqada la Dhammeeyo Wakhtigeeda

Haddii aad ilowdo inaad dhammayso shaqada EVV in ka badan 24 saacadood ka dib markaad bilowday shaqada, nidaamka **eXPRS Mobile-EVV** ayaa kuu soo bandhigi doona inaad dhammayso shaqooyinka furan marka xigta ee aad gasho. **Ma bilaabi kartid shaqo cusub ilaa shaqada furani la dhammeeyo.**




Gal [Mareegta eXPRS](#) adigoo adeegsanayo qalabkaaga gacanta. Dib u eeg bogga laga soo dhaco oo dooro **Qir**.




Waxaa lagu ogeysiin doonaa inaad leedahay shaqo furan muddo ka badan 24 saacadood. Dooro badhanka **Dhammee Hadda.**




Shaashada xigta, dib u eeg macluumaadka ku saabsan shaqada ee ku qoran xagga sare. Ka dibna, geli Taariikhda iyo Saacadda ay ahayd in shaqadu dhammaado. Ka dibna dooro **Sababta Dhammaynta**,

Kadib dhamaystirka tillaabooyinkan, waxaad heli doontaa calaamada sax oo cagaaran oo muujinaysa in shaqooyinka ay dhamaadeen:



# Lifaaqa B: Dhammaynta Shaqada Goor Dambe

Waxaa jiri kara waqtiyo aadan awoodin inaad dhaamaynta shaqadaada ku muujiso nidaamka **eXPRS Mobile-EVV** xiliga aad joojineyso shaqada. Tusaale ahaan, qalabkaagu ayaa laga yaabaa inuusan lahayn koronto ama intarneet xiliga aad shaqada joojineyso, iwm.

Xaaladahan markay jiraan, raac tillaabooyinka sare ee hoos yimaada ciwaanka "**Dhammaynta Shaqadaada"** marka ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo. Waxaad sidoo kale geli kartaa ablikeeshanka Desktop-ka ee eXPRS adigoo adeegsanayo kombayutar ama gacanta ayaad ku gelin kartaa **Wakhtigaaga Dhammaynta Shaqada, ka dibna Sababta ayaad ka dooran kartaa liiska hoos-u-dhaadhaca ee khuseeya ee** Sababta Beddelka Dhammaynta Shaqada.

Haddii gacan ku sixida ama gacan ku qorida waqtiyada Bilawga/Dhammaynta shaqada ee ***qabyada*** biilka ee EVV SD loo baahan yahay, raac tilmaamaha ku jira Hagaha Caawinta ee soo socota: **Sixida ama ku darista Shaqada EVV ama Biil kale oo gacan ku qorid ah.**

# Lifaaqa C: Macluumaad Gaar a uh Adeegga

## Daryeelka Gargaarka Maalinlaha ah ee OR507

Waa kuwan faahfaahin qaas ah oo ku saabsan Daryeelka Gargaarka Maalinlaha ah ee OR507:

- **Nooca Qaybta:** "Maalin" (ma aha "Saacad"). Waxaa lagu siinayaa qiime maalinle ah oo go'an.
- **Biilka**: Waa in biilka la soo dallaco 24-saac kasta iyadoo lagu salaynayo wakhtiga aad shaqada gashay.
- **Waqtiga Dhammaynta ee Tooska ah**: Nidaamka eXPRS wuxuu dejiyaa wakhtiga Dhamaynta shaqada wuxuuna ka dhigaa 24 saacadood ka dib bilowga shaqada.
- Waqtiga. Tusaale ahaan, haddii aad shaqada soo gasho 4:00 galabnimo, Wakhtiga Dhammaynta wuxuu noqon 4:00 galabnimo maalinta xigta.
- **Saacadaha Shaqada:** Kaliya 16 ka mid ah 24ka saacadood ayaa ku xisaabsan xadka shaqadaada ee toddobaadlaha ah. 16 saacadood waa waqti "soo jeedis", 8 saacadoodna waa waqti hurdo.
- **Biilka wax ka yar 16 saacadood:** Biilasha wax ka yar 16 saacadood ayaa la hakin doonaa si ay ODDS ugu sameeyaan dib u eegis ka hor inta aan la bixin lacagta.
- **Biilal Isku Mid ah:** Haddii aad biilka 2 qaybood oo maalinle ah ku soo dalacdo hal muddo oo 24-saac ah, biilka labaad waxaa loo diidi doonaa nuqul ahaan.
- **Soo galida iyo Ka-bixida Shaqada:** Wixii ah maalmaha isku xiga ee Daryeelka Gargaarka ah, muuji ka bixida shaqada ka dib 24-saac kasta oo shaqo ah oo isla markiiba muuji galida shaqada si aad u bilowdo shaqada xigta.

- **Daryeelka Habeenkii:** Ha kala goyn biilasha saqda dhexe; nadaamku ayaa maamuli doona shaqooyinka habeenkii.
- **Qaybaha Biilka:** Biilasha Daryeelka Gargaarka ah uma kala goyn kartid qaybo yaryar (tusaale, qaybo ah 16 saacadood). Nidaamku wuxuu si toos ah u buuxinayaa in Waqtiga Dhammaynta shaqadu noqdo 24 saacadood ka dib Waqtiga Bilawga shaqada. Isbeddelka ku aadan in ka yar 24 saacadood ma la kaydin doono.